

# U-MIDEYSAN CADAALADDA



Ohio • Xagaaga 2011

## U Diyaar-Garowga Ku-Guuleysiga 2012

**Qandaraasyada ugu-waaweyn ee SEIU Local 1 ayuu wakhtigu ka dhacayaa 2012...Dhammaan Toddoba Gobol ee Local 1 u ka jiro.**

WAA WAKHTIGEEDII heerarkooda sare loogu qaadi lahaa qandaraasyada iyo sidii loo ilaalin lahaa wixii horay inoogu soo kordhay ee aan ku guuleysanay. Wadajir, ayaan ugu wada guuleysan karnaa mushqaayadah iyo manfaca aan ugu baahannahay inaan taageerno qoysaskeena.

ADIGA ayaa awoodda u haysta inaad xoojiso ururkaaga shaqaale. Haddii xubno kastaa u heellanaadaan inay arrinta ku jiraan oo ay ka hadlaan, waxaan yeelan doonaa aasaas adag markaan ku sii socono sannadka 2012.

## ISKU SOO BAXA SEBTEMBER 28:

- **Cincinnati:** Goobtu waa Queen City Tower markay tahay duhurka (301 East 4th Street, Cincinnati, OH 45202)
- **Cleveland:** 200 Public Square markay tahay 4:00 galabtii (pm.).
- **Columbus:** Goobtu waa City Hall markay tahay duhurka

## Isku Duubnaan iyo Iska-warhayn.

- **Kulanka Xiga ee Xubinta Sebtember 10**  
U wac xafiiska ururkaaga si aad u hesho faahfaahin!
- **Isqor Liiskayga Email: SEIU1.ORG**
- **Naga hel dusha Facebook:**  
[Facebook.com/SEIULocal1](https://www.facebook.com/SEIULocal1)

## Horseedayaasha Cusub Ayaa Hawshoodii Kordhiyay

XUBNAHA CLEVELAND ayaa arrimaha gacan qayb-qaadanaya iyaga oo horseedayaal noqonaya markii ugu horreysay. Horseedayaasha cusub ee ay ka midka yihiin **Eric King, Jennifer Metz** iyo **Rodney Kirby** ayaa kaalintooda madaxdino ka qaadaya goobahooda shaqo. Kuwa kale ee madaaxda wakhtiga dheer soo ahaa ee ay ka midka tahay **Sandra Ellington** ayaa gacan qabsho siiya kuwa cusub.



Horseedayaasha **Sandra Ellington & Eric King** (kuwa sawirka ku jira) ayaa ka codsada asxaabtooda Xubnaha Local 1 inay arrimaha gacan ka geystaan. Markay tahayna **Columbus, Brian Smith, Claude Smith** iyo **John Padgett** ayaa ku helay shahaadooyin ay ku dhammaystirteen koorsada Madaxnimada SEIU Local 1 markay ahayd Julaa 23.

*Ma jeceshahay inaad madax ka noqoto meesha aad ka shaqeyso? Maantaba u wac xafiiska ururkaaga shaqaale maantaba!*

## Badbaadi Mushqaayadaheena iyo Manfceena Aan Sida Adag u Kasbanay

MARKII AY WESTERN & Southern heleen \$77 milyan oo ah lacag dowladda ka socota si ay u dhisaan Queen City Tower, waxay ku ballan-qaadeen inay shaqada qoraan qandaraasle dayactire mas'uul ah.

Laakiin Western & Southern waxay doorteen EMS. Shaqaalaha EMS ayaan lahayn heerarka la lafilayo ee ah mushqaayad iyo manfac laga dammaanad qaado, oo ma laha nidaam lagu xalliyo arrimaha ka dhaca goobta shaqada, mana laha cod ay ku leeyihiin shaqada markay joogaan.

Haddii ay EMS siiso adeegyada dayactirka loogu talagalay dhismayaasha xafiis ee cusub ee ugu ugu waaweyn Cincinnati ee ku yaal bartamaha magaalada, waxay halis galin doontaa wixii aan sida adag uga soo shaqeynay ee aan ku guuleysanay.

**Arrimaha Ka hawl-gal: La xiriir horseedahaaga ama xafiiska ururka shaqaalaha.**

## Local 1 ayaa Weydiinaya Kongereska: Aawaye shaqooyinkii?




Saddex Xubno ka ah LOCAL 1 ayaa codsanaya in laga helo shaqooyin wanaagsan Ohio: John Padgett, Claude Smith, iyo Kevin Daniels.

SEIU LOCAL 1 ayaa kala qaybgashay beesha inay kaga hor yimaaddiin Rep. Steve Stivers goobta OSU markay ahayd Ogast 15. Xubnaha iyo taageerayaashooda ayaa iskugu yihimid carwo shaqo oo u marti-sooray Xildhibaan Kongeresku sidii loo taageeri lahaa kuwa raadinaya shaqada iyo sidii shaaca looga qaadi lahaa diiwaankiisa codbixinta laga xishoodo ee ku saabsan xeerka shaqada.

Xubin Local 1 **Kevin Daniels** ayaa meesha u joogay si codkiisa lo maqlo. **"Jamhuuriyiinta ayaa looga baahan yahay inay kala shaqeeyaan dimoqraadiyiinta sidii ay u abuuri lahaayeen shaqooyinka. Siyaasiyiinta is dirireysa ayaan cidna ka caawinayn sidii ay shaqada ugu noqon lahaayeen."**

Usbuucii hore, boqollaal reer Ohio ah ayaa ku soo ururay dibadda xafiiska Afhayeen John Boehner ee ku taal West Chester sidii ay uga codsan lahaayeen inuu ficiil uga qaado sidii shaqooyin loo abuuri lahaa. Nasiib-darrose, markay dadkii mudaharaadayay weydiisteen inuu ballan loogu qabto inay la kulmaan Afhayeenka, xafiiskiisa ayaa ugu jawaabay inay qufulaan albaabbada.



Noofambartan, cod bixiyeyaasha Ohio ayaa go'aansan doonta in laga noqdo SB 5, oo ah sharci si daran u xaddidaya xuquuda gorgortamitaanka wadajirka ah ee shaqalaha gobolka. Hubi in codkaaga la maqlo. U codee MAYA Arrinta 2 (Issue 2) markay tahay Noofember 8!

Xubnaha SEIU Local 1 ayaa waliba ka shaqeynaya arrimaha doorashooyinka dowladda hoose ee Columbus iyo Cincinnati. La xiriir xafiiska ururkaaga shaqaale sidii aad arrimaha uga qayb-qaadan lahayd.